

## Muxuu yahay baaritaanka kansarka mindhicirradu?

Baaritaanka kansarka mindhorrada waxaa lagu kala ogaadaa inaad kansarka mindhicirrada qabtid iyo in kale. Baaritaanku wuxuu gacan ka geysan karaa ka hortagga kansarka mindhicirrada ama ogaanshaha inta uu kansarku bilowga yahay oo ay daawayntiisu sahlan tahay.

NHS waxay dadka u dirtaa baaritaan saxaro oo bilaash ah oo aad sambal saxaro ah oo yar isaga qaadayso. Saxarada ayaa shaybaarka la geeyaa si wax dhiig ah looga baaro.

Dhiiggu wuxuu calaamad u noqon karaa buro ama kansarka mindhicirrada. Buradu mindhicirka ayay ka soo baxdaa, taasoo muddo ka dib kansar isu beddeli karta. Haddii baaritaanka wax aan caadi ahayn lagu arko, baaritaan dheeraad ah oo sida badan cisbitaalka lagu sameeyo ayaa laguuri diri karaa.

Da' kasta oo aad jirtid, haddii aad isku aragtid calaamadaha kansarka mindhicirrada u tag dhakhtarkaaga (GP), xataa haddii aad dhowaan baaritaan martay.

## Maxaa dadka looga baaraa kansarka mindhicirrada?

Kansarka mindhicirradu wuxuu ka mid yahay kansarrada aadka loo yaqaan, waxaana looga hortagi karaa in si joogto ah la isaga baaro ama in la ogaado inta uu bilowga yahay oo ay daawayntiisu sahlan tahay.

## Yaa loogu talagalay baaritaanka kansarka?

Waxaa loogu talagalay qof kasta oo London ku nool oo da'diisu u dhexeyso 56 iyo 74, iyadoo 2025 ka 50 jirrada laga bilaabi doono. Marka aad da'daas gaartid, 2 sano oo kasta qalabka baarista ayaa laguuri soo dirayaa. Mar kasta oo qalabka laguuri soo diro waa inaad isticmaashaa.

## Sidee ayaan ku heli karaa baaritaanka guriga lagu sameeyo?

Qof kasta oo England ku nool oo dhakhtar (GP) ka diiwaangashan, si toos ah ayaa qalabka baaritaanka cinwaanka gurigiisa looguuri soo dirayaa.

## Goorma ayaan jawaabta helayaa?

2 toddobaad gudohood ayaa jawaabta boostada laguuri soo dirayaa. Haddii aad baaritaano dheeraad ah u baahan tahayna waa laguuri sheegayaa. Haddii baaritaan dheeraad ah laguuri diro, khasab ma aha inaad kansarka mindhicirrada qabtid.

Help us  
Help you

Screening  
saves  
lives

0909 707 6060  
Khad gargaar oo bilaasha ah:


Ha la daahin.

Haddii lagu soo diro qalabka  
baaritaanka kansarka  
mindhicirrada ee NHS ta,  
musqusha horay ka gee.


**SHN**

## Sida loo isticmaalo qalabka baaritaanka kansarka mindhicirrada

1. Taariikhda maalintaas ku qor dhalada sambalka dusheeda
2. Ku qaad saxarada, weel ama lakabyo xaashida musqusha ah
3. Ka ilaali in saxaradu ay biyaha musqusha taabato
4. Wareeji furka si aad dhalada sambalka u furtid
5. Si aad sambalka saxarada u qaaddid, caagga dheer dhexgeli saxarada ilaa dhinacydoo dhan ka qarsoomaan
6. Saxaro yar ayaa baaritaanka looga baahan yahay. Fadlan ha badin saxarada



7. Ku celi caagga dheer dhalada oo tuuji furka si aad dhalada u xirtid
8. Dhalada mar haddii aad xirtid dib ha u furin
9. Marka aad dhalada xirtid, fadlan gacmaha dhaqo
10. Ku rid dhalada sambalka boqshadda sambalka lagu celinayo
11. Fur sharootada oo ku xir boqshadda, ka dibna boostada ku soo dir
12. Labo toddobaad gudohood ayay jawaabta baaritaanku kuugu imaanaysaa



Haddii lagu soo diro qalabka  
baaritaanka kansarka  
mindhicirrada ee NHS ta,  
musqusha horay ka gee.

Ha la daahin.

[nhs.uk/bowel-screening](https://nhs.uk/bowel-screening)